


Hawsha:

In la horumariyo
waxbarashada farshaxanka-
ee isku dhafan oo dadka
barta ixtiraamka iyo
qadarinta iyada oo la
horumarinayo madaxa,
wadnaha, iyo gacmaha
carruurta ka soo jeeda
dhammaan xaaladaha iyo
dhaqamada kala duwan.

PVS qofna takoori mayso iyadoo
ay la xiriirto jinsiyada, midabka,
dalka laga soo jeedo, caqiiqada,
lab ama dheddig, qowmiyadda,
dookha galmo, naafanimada
maskaxeed ama jireed, da'da,
da'ada, halka aad asal ahaan
laga soo jeedo, awoodda dhanka
ciyaareed, baahiyaha gaarka ah,
Aqoonta Luqadda Ingiriisiga ee
loo leeyahay, ama
guusha tacliimeed.



Ku soo dhowow Dugsiga Dadweynaha Madaxa bannaan ee Village ee Portland



Ms. Poetsch's class - wall hanging

Portland Village School
4650 S Macadam Ave.
Portland, OR 97239
Phone: 503-445-0056
Fax: 503-445-0058
E-mail: office@portlandvillageschool.org

Portland Village School
4650 S Macadam Ave.
Portland, OR 97239
503-445-0056
office@portlandvillageschool.org
www.portlandvillageschool.org



XAQIIQOOYIN DEGDEGA AH:

- Waxaa la furay 2007
- Wuxuu u adeegayaan
fasallada K-8
- Waldorf ay dhiirigelisay
- Muusik, Farshaxan iyo
Farsamada Gacanta oo
loogu talagalay
dhammaan fasallada

Ma daneynaysaa in aad isqorto?

Fadlan wac 503-445-0056
wixii macluumaad ah.

Macluumaadka

Marka la joogo Dugsiga Village ee Portland, waxaanu wax barnaa ilmaha oo idil. Wuxaan jecel nahay in aan dhahno waxaan wax barnaa "madaxa, wadnaha iyo gacmaha" iyada oo la xannaanaynayo ardayda koritaankooda garasho, jireed, iyo dareen.

Waxyaabaha tacliinteeda ugu muhiimsani waa ka dhigida mid xiiso leh iyada oo la isticmaalayo muusik iyo heeso, farshaxan, riwaayad, luqad labaad, xirfadaha nolosha iyo shaqo gacmeedka. Manhankan dhammeystiran wuxuu ardayda u diyaariyaa in ay buuxiyaan caqabadaha dugsiga iyo nolosha iyaga oo ah kuwo miro-dhal ah iyo bani'aadam isku dhafan. Waanu ku faraxsanahay in aanu carruurta iyo qoysaska kala duwan ee Portland siino waxbarashadan bedelka ah ee dhammeystiran, ee la xaqiijij.

Waa maxay dugsiga madaxa bannaani?

Dugsiyada madaxa bannaan waa dugsiyo dadweyne oo loogu talagay in ay bixiyaan barnamijyo casri oo leh falsafado waxbarasho oo gaar ah iyo/ama bixinta tusaaloooyin laga helayo fursado dheeraad ah oo loogu talagalay ardayda iyo qoysaska ka tirsan nidaamka dugsiga dadweynaha. Dugsiyada madaxa bannaani waa urur ah 501(c)3 oo qandaraas la gala Dugsiyada Dadweynaha Portland si ay u damaanad qaadaan isla markaana u dhowraan madax bannaani heerkoodu sareeyo taasi oo lagu beddelanayo isla xisaabtanka la kordhiyay. Dugsiga madax bannaan waxaa lagu maamulaa Xeerka La Casriyeey ee Oregon (ORS) 338.

Waa maxay xiriirkka ka dhxeeyaa dugsiyada madaxa bannaan iyo PSS?

PPS ayaa ka mas'ul ah kor kala socoshada iyo kormeerkha dhammaan dugsiyada madaxa bannaan ee ay damaanad qaaday degmadu. PPS waxay ururisa waxyaabaha sanadlaha ah ee la iskaga baahan yahay in la bixiyo, waxay la socotaa xasiloonida maaliyadeed iyo waxqabadka ardayga, waxayna hubisaa in dugsiga madaxa bannaani uu u hoggaansan yahay sharciga iyo heshiiska.

Sidee ayuu ardaygu isku qoraa dugsiga madaxa bannaan?

Isqorista dugsiga madaxa bannaan waa in ay ahaataa mid caddaalad ah isla markaana loo siman yahay, waxaan laga yaabaa in ay ku kooban tahay da'da ardayga, heerka fasal ee ardayga, iyo booska bannaan ee jira. Haddii dugsiga madaxa bannaan uu helo codsiyo ka badan booska bannaan ee jira marka la eego heerka fasalka/ fasalka la joogo, markaasi waa in loo sameeyaa bakhtiyaanasiib loo siman yahay si loo go'aamiyo isqorista heerka fasalka/fasalka la joogo.

